

Ballaarinta helitaanka caymis caafimaad oo ay dhammaan helaan

(Oo ay ku jiraan muhaajiriinta sharci la'aanta ah!)

Qof walboo ku nool Gobolka Washington waxaa uu iibsaa karaa caymiska caafimaadka iyo ilkaha ee loo marayo Washington Healthplanfinder™, iyadoo aan loo eegin xaaladda socdaalka.



XAQ-U-YEELASHADA, XAALADAADA SOCDAALKA, IYO BEDQABKA

Ereyada muhiimka ah

Lacagaha caymiska ee joogtada ah

(Premium): Xubin kastaa wuxuu bixiyaa ujuuro bille ah oo loo yaaqaanno premium (lacagta joogtada ah ee caymiska ee bil kasta). Qiimaha lacagtaada caymiska ee bil kasta (premium) wuxuu ku xiran yahay qorshahaaga caymiska caafimaadka.



Lacagaha laga jari karo: Caymiska caafimaadkaaga wuxuu ka bilaabanayaa in lagaa caawiyo bixinta biilashaada ka-dib marka aad ka soo baxdo qaddarka "lacagta lagaa jari karo". Dhammaan qorsheyaasha waxaa ay bixiyaan lacagta daryeelka ka hortagga ah ka hor inta qaddarka lagaa jari karo aan la bixin. **Qorshayaasha Daryeelka Cascade** waxay bixiyaan lacagta daryeelka ka hortagga ah ka hor inta qaddarka lagaa jari karo aan la bixin. Adeegyadan waxaa ka mid ah:



Daryeelka ka-hortagga ah



Booqashada dhakhtarka daryeelka aasaasiga ah si loo daaweeyo jirro ama dhaawac



Adeegyada caafimaadka dhimirka



Daawooyinka guud ee la isu qoro



Daryeel degdeg ah, marka aad daryeel isla-markaasi u baahan tahay laakiinse aadan lahayn xaalad degdeg ah sida wadne qabad oo kale.

Lacag-bixinta la wadaago iyo Caymiska la wadaago:

Kuwani waa kharashaadka aad bixiso marka aad dhakhtarka aado. Lacag-bixintaada la wadaago waa xaddi cayiman (\$1-\$50). Caymiskaaga la wadaago waa boqolkiiba kharashka adeegga. Qorshahaaga caymiska caafimaadka ayaa bixiya kharashka kale ee ka dhiman booqashadaada.

Kumaa xaq u leh?

Haddii aad ku nooshahay gobolka Washington, waxaad caymiska caafimaadka ka iibsaa kartaa Washington Healthplanfinder, xitaa haddii aad tahay muhaajir ama soo-galooti aan sharci haysan. Uma baahnid jinsiyadda Mareykanka, kaarka cagaaran (green card), ama warqadaha kale ee socdaalka.

Helitaanka caymiska caafimaadka miyuu saameeyaa xaaladeyda socdaalka ama codsigeyga jinsiyadda?

Helitaanka caymiska caafimaadka ma saameynayo xaaladda socdaalka ama codsiyada jinsiyadda aad adiga, qoyskaaga, ama qof kastoo kula nool soo gudbiya.

Qaadashada caymiska caafimaadka miyuu iga dhigaa "qof ku tiirsan dheefaha dowladda (public charge)"?

Codsashada ama helidda caymiska caafimaadka, iyo helitaanka kaalmada dhaqaale ee lagu bixinayo caymiska, kama dhigayso qofka "qof ku tiirsan dheefaha dowladda (public charge)". Tani wuxuu macnaheedu yahay in aanu saameyn ku yeelanaynin xaaladda socdaalka ama codsiyada jinsiyadda ee loogu talagalay adiga, qoyskaaga ama qofka kale ee kula nool.

Waxaan ahay qof sharci la'aan ah. Macluumaadkeygu ma yahay mid amaan ah?

Bedqabkaaga waa inoo muhiim. **Macluumaadkaaga looma adeegsan doonno fulinta socdaalka.**

Sharciyada gobolka iyo kuwa federaalka ayaa ilaaliya asturnaanta dadka ka codsada caymiska caafimaadka Washington Healthplanfinder. Macluumaadka ku saabsan xaaladda socdaalka ayaa kaliya loo adeegsan doonaa go'aaminta xaq-u-yeelashada caymiska oo looma adeegsado fulinta hawlaha socdaalka.

Su'aalaha Soo Noqnoqda



ISQORITAANKA

Waa maxay "isqoritaan"?

Waxaad isku-qoreysaa caymis caafimaad adiga oo ka dooranaya qorshe caafimaad Washington Healthplanfinder, ka-dibna bixinaya lacagta qorshahaaga caafimaadka.

Goormee ayaan isku qori karaa? Waa Maxay "isqoritaanka furan"?

Qof walba ayaa isku diiwaangeli kara caymiska caafimaadka laga helo Washington Healthplanfinder inta u dhaxeysa **1-da Nof. iyo 15-ka Jan.** Muddadan waxaa loo yaqaannaa **muddada isqoritaanka furan**. Isqoritaanka furan wuxuu dhacaa sanad walba.

Ka waran haddii aan seegto muddada is-qoritaanka furan? Waa Maxay "isqoritaanka gaarka ah"?

Dadka qaarkood waxaa ay isdiiwaangelin karaan waqtiyo kale. Tani waxaa loo yaqaannaa **isqoritaan gaarka ah**.

Haddii ay noloshadu la soo dersaan isbeddelo nololeed (shaqo waayid, isbeddel ku yimaada xaaladda guurka, dhalashada cunug, iwm.) ama aad tahay qof kasbada dakhli yar, waxaad awoodi kartaa in aad isqorto xilli ka baxsan isqoritaanka furan.

Maxaan u baahan doonaa si aan isu-qoro?

Washington Healthplanfinder waxaa uu ku weyddiin doonaa macluumaad ku aabsan adiga iyo qoyskaaga si uu u go'aamiyo xaq-u-yeelashadaada.

Muddo intee le'eg ayay qaadataa?

Codsiga wuxuu qaadan karaa qiyaastii 1 saac.

Halkeen ka heli karaa caawimaadda isqoritaanka? Ma jiraa caawimo lagu heli karo luuqado kale?

Dhamman caawimaadka isqoritaanka waa **bilaa lacag/ bilaash***. Halkan waxaa ku qoron saddex siyaabood oo caawimo lagu heli karo:



Wac

1-855-923-4633

TTY/TDD: 1-855-627-9604

Caawimaadda waxaa lagu heli karaa in ka badan 200 oo luuqadood.



Ku-xirnow

Ballan ka qabso hagaha caafimaadka, dallaalka ama il kaloo lagu kalsoonaan karo oo bulshadaada ka tirsan.



Booqo

www.wahealthplanfinder.org



ama telefoonkaaga ku iskaan-garee koodhka QR



Si aad u eegto qorshayaasha ka jira degaankaaga, booqo wahealthplanfinder.org. Isticmaal qalabka "Dalaco oo Isbarbardhig Qorshayaasha".

***Haddii aadan oggayn in qof uu aqoonsi u haysto in uu ku caawiyo, ama haddii ay kaa codsanayaan in lacagta adeegooda la siiyo, ka wac Xarunta Taageerada Macmiilka ee Washington Healthplanfinder halkan **1-855-WAFINDER**.**



Su'aalaha Soo Noqnoqda



KHARASHKA CAYMISKA CAAFIMAADKA

Waa immisa qiimaha uu ku kacayo kharashka caymiska caafimaadka?

Kharashka iibsashada caymiska caafimaadka wuxuu ku tiirsan yahay waxyaabaha sida dakhligaaga, inta uu qoyskaaga le'eg yahay, iyo halka aad ku nooshahay.

Baaro oo isbarbardhig ku samee qorshayaasha ku jira wahealthplanfinder.org ama la shaqee kheyraad lagu kalsoonaan karo oo ka tirsan bulshadaada si aad u oggaato inta uu qorshuhu ku kacayo.

Ereyadan maxaa loola jeedaa: lacagta bil kasta joogtada ah ee caymiska (premium), lacagaha laga jari karo (deductible), caymiska la wadaago (co-insurance), iyo lacag-bixinta caymiska la wadaago (copay)?


Khidmadaha: Xubin kasta wuxuu bixinayaa ujuuro bille ah oo loo yaaqaanno premium (lacagta joogtada ah ee caymiska ee bil kasta). Qiimaha lacagtaada caymiska bil kastaa (premium) wuxuu ku xiran yahay qorshahaaga caymiska caafimaadka.

Lacagaha laga jari karo (deductible): Caymiska caafimaadkaaga wuxuu ka bilaabanayaa in lagaa caawiyo bixinta biilashaada ka-dib marka aad ka soo baxdo qaddarka "lacagta lagaa jari karo". Dhammaan qorshayaasha waxaa ay bixiyaan waxyaabaha qaar, sida baaritaannada caafimaadka, ka hor inta aan laga jarin waxyaabihii laga jari lahaa.

Lacag-bixinta la wadaago iyo Caymiska la wadaago: Kuwani waa kharashaadka aad bixinayso marka aad dhakhtarka aado. Lacag-bixintaada la wadaago waa xaddi cayiman (\$1-\$50). Caymiskaaga la wadaago waa boqolkiiba kharashka adeegga. Qorshahaaga caymiska caafimaadka ayaa bixinaya kharashka kale ee ka dhiman booqashadaada.

Waa maxay kharashaadka "jeebka-laga-bixiyo"?

Kharashaadka jeebka laga bixiyo (kuwa laga jari karo, lacag-bixinnada la wadaago, iyo caymiska la wadaago) waxaa loola jeedaa qaddarka aad bixiso marka aad dhakhtar u tagtid.



DOORASHADA QORSHAHA

Waa maxay qorsheyaasha caymiska caafimaadka ee la heli karo?

Waxaa jira saddex heer oo qorshayaasha caymiska caafimaadka ah ee laga heli karo Washington Healthplanfinder: Naxaas (Bronze), Qalin (Silver), iyo Dahab (Gold).

Qaddarka shirkadaada caymiska caafimaadka ay bixiso ayaa ku xiran heerka aad doorato. Celcelis ahaan, qorshaha naxaasta (Bronze) wuxuu bixiyaa ku dhowaad 60%, qorshaha qalinka (Silver) wuxuu bixiyaa ku dhowaad 70%, qorshaha dahabiga (Gold) ahna wuxuu bixiyaa ku dhowaad 80% ee biilashaada caafimaadka.

Naxaas (Bronze): Qorshayaashan waxaa ku kacaya waxyar bil kasta balse waxaad bixinaysaa kharash ka yar marka aad daryeel u baahan tahay.

Qalin (Silver): Qorshayaashan waxaa ay bixiyaan in badan oo kharashkaaga ah marka aad daryeel u baahan tahay balse kharash badan ayaa ku bixi kara. Haddii aad xaq u leedahay Cascade Care Savings qorshayaashan waxaa ku bixi kara kharash ka yar kharashaadka naxaasta (Bronze).

Dahab (Gold): Qorshayaashan waxaa ku baxaya kharash badan bil kasta balse waxaad bixinaysaa in badan oo kharashka ka mid ah marka aad daryeel u baahan tahay. Haddii aad xaq u leedahay Cascade Care Savings oo aadna leedahay baahiyo daryeel caafimaad oo mug weyn leh, qorshayaashan waxaa laga yaabaa in aad ugu habboon yihiin.

Miyaan helaa dhakhaatiir wanaagsan haddii aan doorto qorshaha qalinka (Silver) ama dahabiga ah (Gold)?

Maya. Tayada daryeelka ee dhammaan qorshayaasha waa isku-mid.



Raadi astaanta Cascade Care.
Qorshayaasha Cascade Care wuxuu bixiyaa qiimo badan oo kharashkiisu yar yahay. Oo macnaheedu yahay, lacag-bixintaada caymiska ee bil kasta (premium) ayaad ka helayasaa wax aadan abad ka helin!

